



Wasaaradda H. Maaliyadda JSL oo Markii ugu Horaysay Abaal-Marino Gudoonsiisay Cashuur-Bixiyayaashii Ugu Wanaagsanaa 2020-ka

◆ 1. Wasiirka Horumarinta Maaliyadda JSL Oo Daahfuray Kulan Lagu Falanqaynayey Doorka Agaasimayaasha Guud iyo Guddoomiyeasha Hay'addaha MadaxbanaanEe Dawladda Ee Gacan Siinta Dakhliga

◆ 2. Nidaamka Maareynta Xogta Maaliyadeed ee Somaliland (SL-FMIS)

◆ 3. Wasiirka H. Maaliyadda JSL Oo Tababar Mihiim Ah U Furay 80 Qasneji Oo Ka Tirsan Waaxda Cashuuraha Berriga

Siyaasada Hantida Maguurtada ah (Fixed Asset Policy)



Danjire
Magazine

Fariinta Hawlwadeenada Danjire

Danjire waa xog-side sedex-biloodla ah,kaas oo ay soo saarto Wasaaradda Horumarinta Maaliyadda JSL. Wuxaanu dadweynaha kula wadaagnaa wixii xog ah ee aanu muhiim u aragno, anagoo kusoo ururina wixii dhacdooyin ah ee la xidhiidha shaqada aanu u idmanahay.



Wixii talo iyo toosin ah ee aanu ku horumarin karo xogsidahan iyo guud ahaanba shaqada Wasaaradda waxaad nagula wadaagi kartaan Email-ka Wasaaradda: Info@slmof.org ama formka cabashada iyo talooinka ee Website-ka W.H.Maaliyada www.Slmof.org.

Follow & Subscribe us



Contents

Wasaaradda H. Maaliyadda JSL oo Markii ugu Horaysay Abaal-Marino Gudoonsii-say Cashuur-Bixiyayaashii Ugu Wanaagsanaa 2020-ka.....	4
Wasiirkha Horumarinta Maaliyadda JSL Oo Daahfuray Kulan Lagu Falanqaynayey Doorka Agaasimayaasha Guud iyo Guddoomiyeyaasha Hay'addaha Madaxbanaan Ee Dawladda Ee Gacan Siinta Dakhliga.....	7
Nidaamka Maareynta Xogta Maaliyadeed ee Somaliland (SL-FMIS).....	10
Hannaanyadda Nidaamka SLFMIS.....	11
Wasiirkha H. Maaliyadda JSL Oo Tababar Mihiim Ah U Furay 80 Qasneji Oo Ka Tir-san Waaxda Cashuuraha Berriga.....	12
Buuga Xogsidaha Cashuuraha.....	14
Wasiirkha Wasaaradda Horumarinta Maaliyadda JSL Oo Furay Munaasibad Loo Sameeyay Guddida Dacwadaha Cashuuraha Ee Somaliland	16
Siyaasada Hantida Maguurtada ah (Fixed Asset Policy).....	19
Muwaadin Wax Ka Barro Noocyada Tacriifadaha.....	20
Dyaarinta Miisaaniyad Dhamaystiran Sanadka 2021-Ka Oo Ay Ku Jiraan Dhamaan Faah-Faahimaha Miisaaniyada Hay'addaha Madaxa-Banaan, Dawladdaha-Hoose iyo Deeqaha Dibeda Inooga Yimaada.....	22
Wasiirkha Horumarinta Maaliyada JSL Oo Si Cilmiyeyesan U Falanqeeyey Saamanya Dhaqaale Ee Coronavirus Ku Keenay Somaliland.....	23
Buug-yaraha Miisaniyadda Muwaadinka Somaliland 2020.....	26
Agaasimaha Waaxda Kastamada Wasaaradda H. Maaliyadda JSL oo Tababar u Furay Hawl-wadeenada iyo Daneeyayaasha Kastamka Dekeda Berbera	28
Nuxurka Kulan Ay Guddida Dhaqaalaha ee Golaha Wasiiraddu La Yeeshen qaybo ka mid Ah ganacsatada Somaliland.....	30
Wasiirkha H. Maaliyadda JSL Oo Guddi-hoosaadka Arimaha Dhaqaalah Wakiiladda U Gudbiyey Qorshaha xog qoraal ah oo ku saabsan Siyaasada Hayalka Dhaqaalah Guud ee Mudada Dhexe ee 2021-2023-ka.....	31
Kulanka Wadatashiga Ururada Bulshada-Rayidka Ah Iyo Wasaaradda H.Maaliyadda JSL Ee Dyaarinta Miisaaniyadda Sanadka 2021-Ka	33
Guushii Naadiga Wasaaradda H. Maaliyadda Ee Magaaladda Hargeisa Ee Hanashada Koob-Ka SONYO CUP	38
Naadiga Wasaaradda H. Maaliyadda Ee Magaaladda Burco Oo Ku Guulaystay Koob ay Qabatay Shirkadda SOMTEL.....	39

Wasaaradda H. Maaliyadda JSL oo Markii ugu Horaysay Abaal-Marino Gudoonsiisay Cashuur-Bixiyayaashii Ugu Wanaagsanaa 2020-ka



Hargeysa, September 25, 2020 (W.H.M) - Wasaaradda H. Maaliyadda JSL ayaa markii ugu horaysay abaal-marino gudoonsiisay cashuur-bixiyayaashii ugu wanaagsanaa 2020-ka. Munaasibada abaal-marinta oo ka qabsoontay Hotel Maamuus Magaalada Hargeisa 9-kii September 2020, ayaa lagu

abaal-mariyey 65 cashuur-bixiye oo ka kala yimid guud ahaan gobolada iyo degmooyinka dalka, iyadoo laga soo kala xulay ganacsatada heerar kooda kala duwan, isla markaana xulistooda loo raacay xeerarka iyo habraacyada u yaala cashuuraha dawlada JSL.



Munaasibaa abaal-marinta cashuur-bixiya-ha wanaagsan oo ay kasoo qaybgaleen wasiirka, wasiir ku xigeenka iyo agaasimaha guud ee wasaaradda horumarinta maaliyadda, guddomiyaha rugta ganacsiga, agaasimaha guud ee wasaaadda ganacsiga, gudoomiyaha ka garnaqa dacwadaha cashuuraha iyo marti sharaf kale ayaa noqon doonta mid si joogta ah loo qabto sanadkiiba hal mar, sida uu dhigayo qorshaha sanadlaho ah ee Wasaaradda

Horumarinta Maaliyadda JSL, iyadoo talaabadaas tahay mid hore loogu qaaday xaga dhiirigalinta cashuur-bixiyayaayha, oo ah kuwo kaalin muhiima ugu jira guud ahaan qaranka ayaa abaal-marino noqonaysa guuleystaayasha maanta, sidoo kalena dhiiri-galin u noqonaysa guuleystaasha bari.



Ugu horayn waxa madashaasi ka hadlay Agaasimaha Guud ee Wasaarada Maaliyada Maxamed Cabdi Gurxan, wawaanu hadalkiisa ku bilaabay “Ujeedadu waxay tahay maanta dhawr qodob oo kooban, in dawladu ay u mahadceliso cashuur bixiyeyaasha

guud ee dalka ee cashuurta ay bixiyaan dawladd ahaan iyo qaran ahaan aynu ku tiirsanahay, markaa qodobka noogu muhiimsani waxa weeyi magaca dawladda in dawladdu idin tidhaahdo cashuur bixiyeyaasha guud waad mahadsan tiihin cashuurta aad bixisaan.



Qodobaka labaad waxay tahay in aynu gudoonsiino ama aynu maamuusno tiro cashuur bixiyeyaa ah oo runtii buuxiyey shuruudaha sharciga dakhliga ee cashuuraha bariga iyo kastamadu uu tilmaamo, hadii uu fuliyo shuruudahaasi uu sharcigu u aqoonsado cashuur bixiyaha wanaagsan ee maamuuska mudan”. Sidoo kale Wasiirka Maaliyada Dr Sacad Cali Shire oo isaguna halkaasi ka hadlay ayaa wixa uu yidhi “Dawladdnimada, qaranimada iyo Madax-banaanida iyo cashuurtu waa lamaanayaal oo way wada socdaan. Dawladu waxay u xilsaarantahay inay sugto nabadgalyada muwaadinka, waxay u xilsaaran tahay inay difaacdo qaranka, waxay u xilsaaran tahay inayu ku matasho qaranka saacadaha caalamiga ah ee la isugu yimaado, waxay masuul ka tahay adeega bulshada inay bixiso, waxay masuul ka tahay inay xeerarka aynu ku dhaqano ee aynu isku maamulno” ayuu yidhi Wasiir Sacad. Wasiir ku xigeenka Maaliyada Muuse Ibraahim Salaf oo isaguna halkaasi ka hadlay ayaa wixa uu yidhi “Cashuur bixiyeyaashu waxay inoo yihiin macaamiil, kolkaa inaanu kala xulano, oo marba awodeene intay tahay, imika awodeena abaalmarintu waa mahadnaq iyo xus labadaa qodob weeyaan, markaa waxaana idinku dhiirigalinaynaa inaad cashuurtu bixisaan.

Waxaanu idiinka mahadnaqaynaa sida wanaagsan ee sharafta leh ee aad cashuurtu u bixisaan, waxa kale oo aanu doonaynaa inaanu idinku dhiirigalino dadka aad ka shakidaan ama aan bixin cashuurtu inay ku dhiiradaan cashuurtabixinteeda, sababtoo ah cashuurtu waa dawladdnimo, cashuurtu waa qarannimo,” ayuu yidhi Wasiir ku xigeenka Wasaarada Horumarinta Maaliyada Somaliland Muuse Ibraahim Salaf. Gudoomiyaha Rugta Ganacsiga Somaliland Jamaal Caydiid Ibraahim “Cidii cashuur bixisay ama cashuurtu bixinteeda ku wanaagsan la abaalmariyo, waa dhiirigalin ganacsatada ah iyo dhiirigalin wasaaradda ah, waanu soo dhawaynaynaa waananu uga mahadnaqaynaa Wasaarada Maaliyada hawshaa ay fulisay ee aan filayo inay sanadkii horena ay fulisay, waa xidhiidhkii ganacsatada iyo wasaarada oo hore loo sii mariyo. Sidoo kale waxa iyaguna halkaasi ka hadlay cashuur bixiyeyaashii abaalmarinta la gudoonsiyyey kuwaas oo ku tilmaamayu talaabo muhiim ah oo xukuumadu u qaaday xaga maamul wanaaga, kuwaas oo sheegay inay ku faraxsan yihiin in la abaal mariyo, isla markaana loo mahadnaqdo cashuur bixiyeyaasha wanaagsan dalka.



Wasiirka Horumarinta Maaliyadda JSL Oo Daahfuray Kulan Lagu Falanqaynayey Doorka Agaasimayaasha Guud iyo Guddoomiyeyaasha Hay'addaha Madaxbanaan Ee Dawladda Ee Gacan Siinta Dakhliga



Hargeysa, September 25, 2020 (W.H.M)- Wasiirka Horumarinta Maaliyadda JSL Dr Sacad Cali Shire ayaa 2-dii September, 2020-ka daah-furay kulan lagu falanqaynayey doorka agaasimayaasha guud iyo guddoomiyayaasha hay'adaha madaxabanaan ee dawladda ee gacan-siinta dakhliga. kulankaas oo ka qabsoomay Hetelka Royal Palace ee magaaladda Hargeisa ayaa waxa kasoo qaybgalay Wasiirka Horumarinta Maaliyadda Dr Sacad Cali Shire, Wasiir Ku Xigeenka wasaaradda Md Muuse Ibraahin Salaf, Guddoomiyaha Hay'adaha Shaqaalaha Md Farxaan Aadan Haybe, Agaasimaha Guud ee Wasaaradda H. Maaliyadda Md Maxamed Cabdi Gurxan, Agaasimayaasha Guud ee Wasaaradaha iyo Guddoomi-

yayaasha Hay'adaha Madaxabanaan ee dawladda iyo xubno ka mid ah Agaasime-waaxeedyada Wasaaradda H. Maaliyadda JSL. Ugu horayn Wasiirka H. Maaliyadda Dr Sacad Cali Shire oo isagu kulankaasi ka hadlay ayaa isagu Masuuliyiinta hay'adaha kala duwan ee dawladda ka socday ku guubaabiyey inaanu noqonin Cilaqaadka ay Wasaaradda Horumarinta Maaliyadda la leeyihiin mid ku kooban xaga kharash bixinta oo Kaliya, kaas oo ku dhiirigaliyey inay gacan ka siyyaan oo ay kaalintooda ka ciyaaraan hawlaho dakhli ururinta. isagoo wasiirku tibaaxay in marwalba iyadoo la gudanayo waajibaadka cashuur ururinta hadana in xil la iska saaro ilaalinta cashuur bixiyaha.



“Kulankeenani waxa uu lahaa laba ujeedo, midi waa ujeedo caama, midina waa ujeedo gaar ah. Ujeedada caamka ahi waxa weeyi sidii aynu iskaga kaashan lahayn dakhli ururinta, sidii aynu u heli lahayn waxa inooga qoondaysan dakhliga miisaaniyadda, oo inoo suurtagalinaya markaa inaynu isticmaalno miisaaniyadda oo hay’add waliba ay isticmaasho miisaaniyadeeda. cashuuraha halkaad ka soo galaysaan waxaan isleeyahay waa saddex meelood, meeli waxa weeyi kuwo ay tahay inaad qaadaan oo hay’addaha iyo wasaaradaha qaarbaa GR-kii haya saw maaha? Waa cashuur idin soo maraysa oo aad qaadaysaan. Midina waxa weeyi cashuur aad ku khasbaysaan qof idiin baahan in cashuurta lagu leeyahay uu soo bixiyo. Qodobka kale ee cashuurta idinka soo galaa waa; cida cashuurtu ku waajibtay ee jidkiina soo martay inaad ku wacyigalisaan cashuuraha lagu leeyahay, xitaa

hadaydaan ka qaadi karin amba aydaan ku khasbi karin laakiin inaad wargalisaan hadii lagu leeyahay cashuurahaasi,” Ayuu yidhi Wasiirka Horumarinta Wasaarada Maaliyada Somaliland Dr Sacad Cali Shire. Dhinaca kale Agaasimaha Guud ee Wasaaradda Horumarinta Maaliyadda Maxamed Cabdi Gurxan oo isaguna madashaasi hadal ka jeediyeey ayaa sharaxaad ka bixiyey ujeedada kulankaasi, kaas oo sheegay inuu daaran yahay sidii la iskaga kaashan lahaa inaanay lumin cashuurta mashaariicda aan miisaaniyada ku jirin oo ay inta badan ku lumaan saddex cashuurood, kuwaas oo kala ah. 1) cashuurta qandaraasyada mashaariicda miisaaniyada ka baxsan oo ah 3%. 2) cashuurta macaashal-macaashka shaqaalaha laga gunneeyo mashaariicda miisaaniyada ka baxsan. 3) cashuurta laga-reebo ma-daganayaasha.

Agaasimaha Guud oo arimahaasi ka hadlayaana waxa uu yidhi “Waxaanu halkan marka ugu horaysa aanu idinla wadaagi doonaa inaanu idinla socodsiino halka ay marayaan dedaalada ay dawladdu waddo ee ay ku dardar galinayso kuna kordhinayso dakhliga qaranka oo marka hore waa la socodsii si aad u ogaataan halka ay wax inoo marayaan. Qdobka kalena waxa uu ka hadli doonaa waaxda cashuuraha bariga iyo saraakiil farsamo yaqaano ahi ay inoo faahfaahin doonaan waajibaadka sharci ee sharciga maamulka maaliyadu uu saaray guddoomiyeyasha hay'addaha madaxabanaan iyo Agaasimayaasha guud ee wasaaradaha waajibaadka ka saaran ilaalinta dakhliga dawladda ee wasaaradaha iyo hay'adaha ay ka tirsan yihiin ka dhalanaya. Laakiin qdobka kale ee isna xusida mudan ee maanta in badan aynu dul istaagi doonaa waxa weeyi miisaaniyadaha badan ee runtii kaalmooyinka ah ee wasaaradaheena iyo ha'adaheenu ay helaan inaad iyadana ku ilaalisan wixii mashaariic ah, cashuuraha inaad mashaariicda ka jartaan, wixii guno iyo mushahar ahna inaad cashuurta mushaharka iyo gunooyinka ka reebtaan,” ayuu yidhi Agaasimaha guud ee Wasaarada Horumarinta Maaliyada Somaliland Maxamed Cabdi Gurxan. Intaas ka dib waxa madashaasi presentation kasoo jeediyey Agaasimaha Waaxda Cashuuraha Barriga Cabdisalaan Busi, iyo Agaasimayaasha

Guud oo su'aalo door ah ku waydiiyey madaxda Wasaaradda Horumarinta Maaliyadda, isla markaana fikiro kala duwana oo ku taxaluqa sidii la iskaga kaashan lahaa arimahaasi halkaasi kusoo jeediyey. Sidoo kale Guddoomiyaha Hay'adaha Shaqaalaha Farxaan Aadan Haybe oo isaguna halkaasi ka hadlay ayaa ka waramay muhiimada ay leedahay in hay'adaha dawladdu ay iskaashadaan, waxa uu yidhi “Waxaan u arkaa in shirkani uu muhiim yahay, wasaaradaha iyo hay'adaha dawladda inuu muhiim u yahay, hadii dakhli la waayo oo dakhliga aynu ku talo galnay odoroskeedii soo xaroon waayo ama farsamooyin aynu ku kordhino aynu wayno suurtagal maaha in wasaaraduhu wacyiga ay u ordyaan iyo hay'adaha dawladuba inay culays ku saaraan Wasaarada Maaliyadda in miisaaniyadda loo kordhiyo. Ka hay'add ahaan diyaar ahaanu u nahay in wixii suurtagal ah ee itaalkayaga ah inaanu la shaqayno guud ahaana in aanu la wadashaqayno waa muhiim,” ayuu yidhi Guddoomiyaha Hay'adda Shaqaalaha Farxaan Aadan Haybe.

Nidaamka Maareynta Xogta Maaliyadeed ee Somaliland (SL-FMIS)


Somaliland Financial Management System (SLFMIS) waa nidaam loogu talo galay in lagu maareeyo maaliyadda qaranka Somaliland. Nidaamkan waxaa loogu talo galay in uu kaydiyo xogta maaliyadeed ee qaranka si looga heli karo warbixino iyo xisaab-xidh maaliyadeed oo dhamaystiran.

Nimdaakan waxa isticmaal 58 wasaaradood iyo hay'adood oo u adeega qaranka jamhuuriyadda Somaliland, waxa uu ka hirgalay dhamaan goboladda dalka oo si toos ugu isticmaala qabashada dakhliga iyo bixinta kharaashaadka dawaladda. Waxana si toos ugu xidhan in ku dhow 700 oo isticmaale.

Nidaamkan waxa adeegsada dhamaan maacimilka maaliyadeed ee ay qaranka u hayso Wasaaradda Horumarinta Maaliyadda waxanna uu koobsadaa meertadd miisaniyadeed ee ay ka midka yihiin.

- Diyaarinta iyo Qorshaynta Miisaaniyada (Budget Planning & Preparation)
- Kaantaroolidda Miisaniyadeedka (Budget Control)
- Fulinta Miisaaniyadda (Budget Execution)
- Iyo Warbixinaha Maaliyadeed (Financial Reporting)

Xafisyadda Dawladda ee Adeegsada Nidaamkan SLFMIS-ka



Nidaamkan ugu horayn waxa uu fudueeyay Qorshaynta, diyaarinta iyo dajinta miisaaniyadda qaranka oo ay Waaxda Maaliyada ee WHM ay u qaabilسان tahay, waxdaas oo wada shaqayn la leh Wasaaraddah iyo Hay'adaha qaranka sidii ay u diyaarsan lahayeen miisaaniyadooda sannad walba.

ururinta oo ay u xilsaaran yihiin xarumaha dakhliga ururiya ee Cashuuraha Berriga iyo Kastamadda Dalka. Dakhligaa la soo galiyo nidaamkan SLFMIS hubin ahaan waxa uu maraa xafiiska Xisaabiyaha Guud. Hubin ka dibna waxa u uku xarooda Bangiga dhexe ee JSL.

Nidaamkan waxa kale oo loo adeegsadaa dakhli

Qaybta saddexaad ee adeegsata nidaamkan SLFMIS ayaa ah xarumaha kharashka gala oo ay ka midka yihiin wasaaraddaha iyo hay'addah dalka iyaga oo nidaamka dhexdiisa ku soo dalbada kharasha ay galeen isla markaan hubin ahaan u gudbiya Xafiiska Xisaabiyaha Guud kaas oo markuu ku qanco sax-naanshaha kharashkaas ogalaata in lala bixi karo.

Nidaamkan SLFMIS waxa wada shaqyn iyo isku xidh laga dhexaysiiyay nidaamka ay Bangiga ee loo

yaqaan (Core Banking System) si ay isku waydaarsadaan maclumaadka looga baahan yahay labada dhinac ee Xisaabiyaha Guud iyo Bangiga Dhexe ee JSI. Isku xidhkaa ayaa ku jira marxladii hirgalinta oo aan soo wada dhamaan.

Ugu dambyan nidaamkan ayaa waxa adeegsanaya Hanti-dhawraha Guud oo kor-joog iyo ilaalin ku leh maacaamilka maaliyadeed ee dhex marayaa nidaamkan SLFMIS.

Hannaanyadda Nidaamka SLFMIS

Nidaamkan waxa uu ka kooban yahay Hannaanyadanhoos ku xusan oo isugu jira kuwo fulay oo hadda loo adeegsada shaqo maalmeedka, kuwo ku jira marxaladda tijaabada oo la sugay in lagu balaadhiyo dhamaan xarumaha dawladda i iyo kuwo gacanta lagu hayo samayntooda oo u gudbi doona marlaxadda tijabaada kadibna si dhamaystiran loo hirgalin doono.

Hannaanadda dhamaystirmay ee haatan la adeegsado.

- Hannaanka Diyaarinta & Qorshaynta Miisaaniyadda (Budget Planning & Preparation)
- Hannaanka Qoondaynta Miisaaniyadda (Warrants & Sub Warrants)
- Hannaanka Maamulida Kharashaadka (Expenditure Management)
- Hannaanka maamulida lacag bixinta (Treasury Management Module)
- Hannaanka Maamulida Mushaharaadka Shaqaalaha (Employee Payroll Management)
- Hannaanka Dakhli Qabashada (Revenue Capturing Module)
- Hannanka Maamulidda Heeshiisyada (Contract Management Module)
- Warbixinaha Maaliyadeed ee Nidaamka (Financial Reports)
- Warbixinaha Shaxaysan ee loogu talo galay Maamulka (Financial Dashboards)

Hannanadda ku jira marlaxadda tijaabada.

- Hannaanka Dhakli Ururinta (Revenue Collection Management [Tax, Visa and licenses, GST])
- Hannaanka diiwaangalinta iyo Maamulidda Hantida dawladda (Public Asset Registration & Management)
- Hannaanka Maamuidda Daymaha Qaranka (Debt Management Module)
- Hannaanka Iibsiga Dawladda (Purchase Management)

Hannanadda samayntooda gacanta lagu hayo :

- Maamulidda Hantidda Kayda ah (Inventory management)
- Hannaanka Maamulida Qandaraasyadda Qaranka (E-Procurement /Tender Management)
- Hannaanka Kaydinta Xogta Maaliyadeed (Data Warehouse & Business Intelligence)

Qormadda tan xigta waxa aan ku baran donna qaabka uu shaqeeyo Hannaanka Diyaarinta & Qorshaynta Miisaaniyadda (Budget Planning & Preparation) qaybaha uu ka kooban yahay, iyo Wasaaraddaha, Hay'adaha iyo Waxaha ay khusayso shaqadani

Wasiirka H. Maaliyadda JSL Oo Tababar Mihiim Ah U Furay 80 Qasneji Oo Ka Tirsan Waaxda Cashuuraha Berriga



Hargeysa, September 25, 2020 (W.H.M) - Wasiirka Wasaaradda Horumarinta Maaliyadda JSL Dr Sacad Cali Shire ayaa 17/09/2020 tababar mihiim ah u furay 80 qasneji oo ka tirsan Waaxda Cashuuraha Berriga, kuwaas oo 60 ka mid ahi dumar yihiin, isla markaana ka kala yimid gobolada iyo degmooyinka Somaliland.

Tababarkan oo ah kii u horeeyey ee noociisa ah ee loo qabto qasnajiyadda cashuuraha berriga ayaa loo sameeyey nidaam habraac shaqo oo cad oo ay raacaan, iyadoo halkaasi lagu gudoonsii-

yey dhamaantood buuga Hagaha Qasnejiyadda. Sidookalewaxamadashaasilagusoo bandhigay System casri ah oo iswada (automated App) oo isku xidhaya dhamaan cashuuraha gaadiidka sida wado-maris, kala-wareejinta iyo bileydhka cusub, kaas oo qalab casri ah lagu isticmaalayo, kuna xidhan xogta gaadiidka dalka oo dhan, isla markaana mustaqbalka fariimo gaar ah oo cashuuraha ah loogu diri doono, lagulana xidhiidhi doono dhamaan gaadiidleysa dalka oo dhan.



Munaasibadan oo ka qabsoontay Hotelka Baraar ee Magaaladda Hargeisa ayaa waxa kasoo qaybgalay Wasiirka Wasaaradda Horumarinta Maaliyadda JSL Dr Sacad Cali Shire Agaasimaha Waaxda Cashuuraha Barriga Cabdisalaan Maxamed Maxamuud, Ku xigeenkiisa Khadar Laas, Agaasime ku xigeenka Waaxda Xidhiidhka Dadwaynaha iyo saraakiil kale oo ka tirsan waaxahaasi. Ugu horayn Wasiirka Wasaarada Horumarinta Maaliyada Somaliland Dr Scad Cali Shire ayaa ka waramay muhiimada tababarkani uu leeyahay, waxaanu yidhi "Xisaab oo dhami waxa ay martaa

saddex gacmood. Waa Xisaabiyaha, kaashiyeerka iyo auditor-ka. saddexdaa ka ugu muhiimsani waa Kaashiyeerka, hadii kaashiyeerka wax ka qaloocdo xisaabiyuhuna ma toosin karo, auditor-kuna ma toosan karo. Kaashiyeerku sidii la doonayey inuu hawsha u qabtay iyo in aanu u qabanin, waxay ku xidhan tahay inuu raacay standards-kii loo dhigay iyo in kale. Markaa waxaad raacaysaan standards-ka, xisaabtuna idinka xumaan mayso, waxna idinkaga soo noqon maayaan, Imtixaankii hore waad gasheen, dabadeed tababarkii ayaa ku xiga, markuu dhamaadana waxa ku xiga imtixaankii kale.



Qof kasta oo ka soo qaybgalay wuu u qalmaa inaanu ku amano oo aanu ku hambalyeyno, sha-haadadana waa la siin doonaa Insha Allaahu bi idmilaahi kariim, waxaan idin rajaynaya tababar wanaagsan," ayuu yidhi Wasiirka Horumarinta Maaliyada Somaliland Dr Sacad Cali Shire. Ugu danbayn waxa halkaasi looga jeediye qasnejiyadda dhawr presentation oo ku taxaluqa shaqooyinka mihiimka ah ee ay u xilsaaran yihiin, iyadoo ugu danbayna dhamaan qasnejiyadda lagu gudoonsiiyey madashaasi Shahaadooyin.

Buuga Xogsidaha Cashuuraha

CUTUBKA 3aad NIDAAMKA ISDIIWAANGELINTA

1. Waa maxay nidaamka is-diwaan-gelintu?

Nidaamka is-diwaan-gelintu waa: hab laguugu diyaarinayo lambarka iyo shahaadada Aqoonsiga cashuur-bixiyaha (TIN Number).



2. Waa ayo cidda is-diwaan-gelinaysa?

Nidaamka is-diwaan-gelintuwaxa uu ku waajibay: qof ama shaqsi kasta, shirkad kasta oo uu sharcigu ku waajibinayo inuu soo gudbiyo Xisaab-celinta iyo ruux kasta oo masuul ka ah cashuur-ka- reebista shaqaalahiisa, Xeerka dakhligu wuxuu dhigayaa inuu is-diwaan-geliyo.

3. Waa halkee goobta nidaamka is-diwaan-gelintu?

Goobaha Nidaamka Is-diwaan-gelintu waxa weeye:

1. Xafiiska Xarunta Isdiiwaangelinta Cashuur-bixiyaha oo kuyaala Xarunta Dhexe ee Waaxda Cashuuraha Berriga TEL 518123
2. Dhamaan Xafiisyada Xarumaha Gobolada Borama TEL 4456519, Gabiley TEL 4486425, M/Jeex TEL 4477163, Berbera TEL 4088833 iyo Burco TEL 711473.
3. Dhamaan Xafiisyada Xarumaha Degmooyinka Gobolka M/Jeex ee 26ka June TEL 514871, Maxamuud Haybe TEL 526370, Axmed Dhagax TEL 525560, Ibraahim Koodbuur TEL 527818 iyo Gacan-libaax TEL 514824
4. Xafiiska Xogsiinta (OSS) ee ku yaala Wasaaradda Ganacsiga, Wershadaha iyo Dalxiiska TEL: 4470275.
5. Xafiiska Rugta Ganacsiga.

4. Sidee ayuu u dhacayaa nidaamka is-diwaan-gelintu?

Nidaamka Is-diwaan-gelintu waxa uu u dhacaya: Cashuur-bixiyahu waxa uu foomka Diwaan-gelinta ka heli karaa xafiiska Diwaan-gelinta cashuur-bixiyayaasha ama xafiiska cashuuraha ee ugu dhaw iyadoo la raacayo tilmaamaha foomka oo faahfaahsan.

TIN: TIN-ku, waa erey af-ingriisi ah oo macnaheedu yahay lambarka Aqoonsiga ganacsadaha.

CUTUBKA 4aad FOOMAMKA CASHUURAHA



1. Waa maxay Foomamka Cashuuruhu?

Foomamka cashuuruhu waxa weeye: foomamka uu cashuur-bixiyuhu u soo buuxiyo iskii ama si ikhtiyaari ah ee uu ku soo buuxiyo cashuuraha kala duwan ee ku waajibay ka hor dhammaadka muddada xeerkuxadiday.

2. Halkee laga helayaa Foomamka Cashuuraha?

Foomamka Cashuuraha berriga waxaa laga helayaa: Xafiisyada cashuuraha berriga ee dalka oo dhan.

3. Waa ayocidda u baahan Foomamka Cashuuraha?

Foomamka Cashuuraha waxa u baahan: Cid kasta oo danaynayaama u baahan Foomamka.

4. Sidee loo buuxbuuxinaya Foomamka Cashuuraha?

Foomamka Cashuuraha waxa lagu buuxin karaa: Electronic, iyo manual labada ba waxaa se shardi ah in ay leedahay Saxeexi iyo shaambaddii cashuur-bixiyaha ama wakiilkisi.

Wasiirka Wasaaradda Horumarinta Maaliyadda JSL Oo Furay Munaasibad Loo Sameeyay Guddida Dacwadaha Cashuuraha Ee Somaliland

“Guddidan Waxa Loo Sameeyay Cashuur Bixiyaha Ee Looma Samaynin Wasaaradda, Guddidan Samaynteedu Waxay Ku Cadahay Xeer Lr 72/2016” Dr Sacad Cali Shire Wasirka H. Maaliyadda



Hargeysa, September 25, 2020 (W.H.M) Wasiirka Wasaaradda Horumarinta Maaliyadda JSL Dr Sacad Cali Shire ayaa 8,8,2020-kii xadhiga ka jaray munaasibad loo sameeyay guddida dacwadaha cashuuraha ee Somaliland. Munaasibadaas ayaa ka qabsoomtay hotelka Ambassador ee magalada hargeysa, iyadoo guddidaasi oo ah guddi cusub oo markii ugu

horaysay laga aas-aasay Somaliland, isla markaana ah guddi madax banaan oo lagu aas-aasay qodobka 209 xeerka cashuuraha bariga ee xeer number 72/2016, guddigan ayaa ka-gar niqidoona dacwadaha idaariga ah ee u dhaxeeya cashuur bixiyahay iyo Wasaaradda Horumarinta Maaliyadda Somaliland.



Kulankan waxaa ka qayb-galy Wisiirka Horumarinta Maaliyadda, Wasiir ku-xigeenka Horumarinta Maaliyadda, Agaasimaha Guud ee wasaaradda, Xeer Ilaliyaha Guud ee Qaranka, Ku-Xigeenka Garyaqaanka Guud, Taliye Ku-Xigeenka ciidanka booliska, Taliyaha Ilaalinta Cashuuraha, Guddomiyaha Rugta Ganacsiga, Gancsato, masuuliinagasimayaaliyoxubnokaladuwan. Ugu horayn waxa madashaasi ka hadlay Agaasimaha Guud ee Wasaaradda Horumarinta Maaliyadda Somaliland Md Maxamed Cabdi Gurxan, waxaanu yidhi "Guddidan waa guddi shaqadooda u madax banaankana madax banaan maamulkahowlsocodsiiinta Wasaaradda Horumarinta Maaliyadda, garnaqa iyo

dacwadaha ay qaadayaan sida uu xeerku tilmaamayo wax ay u leeyihiin awoodo uu xeerku u jideeyay marka la ga yimaado in ay warbixnaha iyo asaaskooda uu leeyahay Wisiirka Horumarinta Maliyadda JSL". Sidoo kale Guddoomiyaha guddida ka- garnaqa dacwadaha cashuuraha oo faahfaahin ka bixiyay shaqada kala duwan ee ay qaban doonaan ayaa sheegay inay guddidaasi tahay mid si madaxbanaan shaqadooda u qabsan doona, kaas oo tibaaxay guddi muwaadinkana xaqiisa ilaalisa isla markaana ganacsadaha cashuurta lunsanayaana aanu dugsi ka dhigan doonin oo dhinackasta waajibkooda sharci ay ka heli doonaan.



Waxa kale oo isaguna madashaasi ka hadlay Jamaal Caydiid Ibraahim Guddoomiyaha Rugta Ganacsiga Somaliland waxaana hadalkiisii ka mid ahaa “Cashuurta kastamka waxa nalagaga qaada dekadda, Halkaas ayaanu ku bixinaa oo wada hadal malaha wixii soo racaa waa cashuuraha berry, waxaasi waxay ku qurux badanyihii wixii nalaga qaadayo iyo wixii nalugu leeyahay inay wax cad ahaadaan oo shuruuc-diisana leh qimayntiisana leh aanu islana ogolnahay, hadii taasi cadaato oo aanay qabyo ahayn u-malayn maayo in maxkamad loo baahanayo, laakiin hadii ay mala-awaal noqoto oo la yidhaa waxa laga qaadaya intaa waxa ka maqnaanaya waa intaa waxa ku fuushay intaa dee muranku wuu badanayaa”. Waxa sidoo kale isaguna madashaasi ka hadlay Taliyaha Ilaalinta Cashuuraha Somaliland, waxaan hadalkiisii ka mid ahaa “Waxa dhacda In anaka iyo ganacsatadu awal ay odhan jireen marka anu u yeedhno

amba aanu cashuurta ka doonayno idinkuunbaa neo yeedhay hadii maanta la idii helay cid inoo garnaqda oo dawladu soo xushay anaka sharafbay noo tahay oo shaqadii aanu haynay ayey wanaajinaysaa guddidani”. Ugu danbayn, waxa halkaas ka hadlay Wasiirka Wasaaradda Horumarinta Maaliyadda JSL Dr. sacad Cali Shire oo faahfaahin ka bixiyay ujeedada loo asaasay guiddida dacwadaha cashuuraha, waxaanu yidhi “Guddidan waxa loo sameeyay cashuur bixiyaha ee looma samaynin Wasaaradda, guddidan samaynteedu waxay ku cadahay xeer Lr 72/2016 markay wasaaraddu dacwad qabto oo ay ka qabto qof cashuurta diiday nidaam baa jira dhigan oo loo maro waa nidaamka xeer ilaaliyaha, lakiin wax aan jirin nidaam u marilahaa cashuur bixiyuhu hadaanu ku qanacsaneen cashuurta lagu soo rogay”.

Siyaasada Hantida Maguurtada ah (Fixed Asset Policy)



Hargeysa, September 25, 2020 (W.H.M) - - - Fadhibii 64-aad ee Golaha Wasiirrada Jamhuuriyadda Somaliland 17/09/2020 ku yeeshay habka maqalka iyo muuqaalka (Video Conference) oo uu shir-guddoominayey Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland, Md. Muuse Biixi Cabdi, kuna wehe-linaayey Madaxweyne-Xigeenka Jamhuuriyadda Somaliland, Md. Cabdiraxmaan Cabdilaahi Ismaaciil (Saylici), ayaa lagu meel-mariyey Siyaasada Hantida

Maguurtada ah ee Dawladda (Fixed Asset Policy). Siyaasadan oo ay kasoo wada shaqeeyeen diyaarin-teeda Wasaaraddaha Horumarinta Maaliyadda iyo Hawla Guud/ Guriyeenta ayaa noqon doonta siyaasada lagu maamulayo Hantida Maguurtada ah, iyadoo wax weyn ka tari doonta dhinaca la socodka iyo xisaabinta qiimaha gaar



Muwaadin Wax Ka Barro Noocyada Tacriifadaha

	Research and Development	\$ 200	\$ 400	\$ 1,500	\$ 3,000
	Translation Services	\$ 150	\$ 300	\$ 1,500	\$ 3,000
	Investment Promotion Services	\$ 200	\$ 400	\$ 1,500	\$ 3,000
	Regional Transport Service	\$ 150	\$ 300	\$ 1,500	\$ 3,000
	Towing Services	\$ 150	\$ 300	\$ 1,500	\$ 3,000
	Taxi Services	\$ 150	\$ 300	\$ 1,500	\$ 3,000
	Motor Truck Services	\$ 150	\$ 300	\$ 1,500	\$ 3,000
	Car Wash Services	\$ 100	\$ 200	\$ 1,000	\$ 2,000
	Private Security Service	\$ 500	\$ 1,000	NA	NA
	Real Estate Agent Services	\$ 200	\$ 400	\$ 1,500	\$ 3,000
	Warehouse And Storage Services	\$ 200	\$ 400	\$ 1,500	\$ 3,000
	Tailor Services	\$ 100	\$ 200	\$ 1,000	\$ 1,000
	Architect And Design	\$ 150	\$ 300	\$ 1,500	\$ 3,000
	Gym	\$ 150	\$ 300	\$ 1,500	\$ 3,000
	Entertainment Services	\$ 150	\$ 300	\$ 1,500	\$ 3,000
	Turf Sport Field	\$ 150	\$ 300	\$ 1,500	\$ 3,000
	Micro – Finance Services	\$ 1,000	\$ 1,500	\$ 4,500	\$ 6,000
	Business Management Services	\$ 150	\$ 300	\$ 1,000	\$ 2,000
	Business Statistics Services	\$ 150	\$ 300	\$ 1,000	\$ 2,000
	Legal Firm	\$ 150	\$ 300	\$ 1,000	\$ 2,000
	Public Notary	150	200		
	Advocacy Service	\$ 150	\$ 300	\$ 1,000	\$ 2,000
	Installation Maintenance And Repair Services	\$ 150	\$ 300	\$ 1,000	\$ 2,000
	Green House/ Nurseries	\$ 150	\$ 300	\$ 1,500	\$ 3,000
	Mortgage	\$ 200	\$ 400	\$ 1,500	\$ 3,000
	Fire Safety Service	\$ 150	\$ 300	\$ 1,000	\$ 2,000
	House Hold Maids Service	\$ 150	\$ 300	\$ 1,000	\$ 2,000
	Massage Services	\$ 150	\$ 300	\$ 1,000	\$ 2,000
	Photography Services	\$ 150	\$ 300	\$ 1,000	\$ 2,000
	Beauty Salon Services	\$ 150	\$ 300	\$ 1,000	\$ 2,000
	Archaeology Services	\$ 150	\$ 300	\$ 1,000	\$ 2,000
	Extermination/ Pest Control Service	\$ 150	\$ 300	\$ 1,000	\$ 2,000
	Farming (Animal Production)	\$ 150	\$ 300	\$ 1,000	\$ 2,000


	Landscape Services	\$ 150	\$ 300	\$ 1,000	\$ 2,000
	Land Survey Services	\$ 150	\$ 300	\$ 1,000	\$ 2,000
	Catering Services	\$ 150	\$ 300	\$ 1,000	\$ 2,000
	Semi Classic Restaurant	\$ 150	\$ 300	\$ 1,000	\$ 2,000
	Semi Classic Hotel	\$ 150	\$ 300	\$ 1,000	\$ 2,000
	Meat Services	\$ 150	\$ 300	\$ 1,000	\$ 2,000
	Seafood Services	\$ 150	\$ 300	\$ 1,000	\$ 2,000
	Auditing Firm	\$ 150	\$ 300	\$ 1,000	\$ 2,000
	Accounting Firm	\$ 150	\$ 300	\$ 1,000	\$ 2,000
	ICT Service	\$ 150	\$ 300	\$ 1,000	\$ 2,000
	Logistic & Procurement	\$ 150	\$ 300	\$ 1,000	\$ 2,000
	Sales & Marketing	\$ 150	\$ 300	\$ 1,000	\$ 2,000
	Advertising Firm	\$ 300	\$ 500	\$ 1500	\$ 3,000
	Monitoring & Evaluation	\$ 500	\$ 800	\$ 1500	\$ 3,000
	Environment Assessment	\$ 500	\$ 800	\$ 1500	\$ 3,000
	Engineering Consultant	\$ 300	\$ 500	\$ 1500	\$ 3,000
	Fund Management	\$ 500	\$ 800	\$ 1500	\$ 3,000
	Laboratory Service	\$ 500	\$ 800	\$ 1500	\$ 3,000
	Sanitation Service	\$ 500	\$ 800	\$ 1500	\$ 3,000
	Classic Tourism Hotels	\$ 500	\$ 800	\$ 1500	\$ 3,000
	Commission Agent	\$ 500	\$ 800	\$ 1500	\$ 3,000

1.3.1.2 AJUURADDA RUQSADDA LIISAMADA GANACSIGA EE BADEECADDHAH

S/N	Nooca Cashuuraha (Type of Tax)	Xadiga Cashuurta
1	Liisanka Soo Dejinta(Import Tax)	4,000,000 /=
2	Liisanka DhoofintaExport Tax	2,000,000
3	Liisanka Soo Dejin Iyo Dhoofin(Import/Export)	6,000,000
4	Liisanka Jumladda (Wholesaler)	2,000,000
5	Liisanka Soo Dejinta Shidaalka(Fuel Importation)	10,000,000
6	Liisanka Kaalmaha Shidaalka(Fuel Station License)	2,000,000

La Soco.....

Diyaarinta Miisaaniyad Dhamaystiran Sanadka 2021-Ka Oo Ay Ku Jiraan Dhamaan Faah-Faahimaha Miisaaniyada Hay'adaha Madaxa-Banaan, Dawladdaha-Hoose Iyo Deeqaha Dibeda Inooga Yimaada



Hargeysa, September 25, 2020 (W.H.M) - Sidiif Haanu horaba dadweynaha ula wadaagnay horaantii sanadkan bisha February sideedii, wakhtigaas oo wasaaraddu kulan hawleed isugu yeedhay hay'adaha madaxa-banaan ee dawladda iyo masuuliyiinta dawladdaha hoose. Ujeedada Kulan-Hawleedkaas oo daraanayd sidii loo samayn lahaa miisaaniyad dhamaystiran oo ay ku jiraan dhamaan faah-faahimaha miisaaniyada hay'adaha madaxa-banaan, dawladdaha-hoose iyo deeqaha debeda inooga yimaada. Hadaba Wasaaradda Horumarinta Maaliyadda JSL iyadoo taa ka duulaysa waxay in dhaweydba ku hawlanayd meel-marinta arimihii layskula qaatay kulankaas, saraakiil ka socota Waaxda Miisaaniyadda iyo Qorshaynta ayaa safaro loogu kala diray gobolada iyo degmooyinka, kuwaas oo tababaro ka fuliyey 11 degmo, tababaradaas oo ku saabsanay Adeegsiga Sumad Xisaabeedka Caalamiga, iyo Xogta Maaynta Maaliyadda Dawladda waxa ka faaiiday-sanayey saraakiisha maamulka lacagta iyo xisaabi-

yayaasha Dawladdaha Hoose, iyo waliba Hay'adaha Madaxa-Banaan. 11-ka Degmo ayaa kala ahaa 9-ka uu ka socdo Mashruuca Wadaaga ah ee H.Dawaladdaha Hoose ee JPLG, iyo 3-da uu ka socdo Mashruuca Maamul Daadajinta Adeeg-Bixinta Dawladdaha Hoose, kaas oo laga maalgaliyo khasnada Dawladda, halka Hay'adaha Madaxa-Banaan ee Miisaaniyadda lala midayn doono ta Dawladda-Dhexe sanadka soo socdaa yihin Wakaaladaha Biyaha Degmooyinka Hargeisa, Burco, Berbera, Boorama, Gabley, Madbacadaha Qaranka, Baanka Dhexe, Dekeda Berbera, iyo Haamaha Shidaalka Berbera. Xeerka Maamulka Maaliyada Dawladda Xr. Lr. 75/2016 ayaa jidayna jaan-goynta odoros maaliyadeed oo dhamaystiran, yagleelida Gudida ka Gar-Naqa Dacwaha Cashuuraha, iyo Hay'ada Dakhliga Dawladda.

Wasiirka Horumarinta Maaliyada JSL Oo Si Cilmiyeyan U Falanqeeyey Saamaynta Dhaqaale Ee Coronavirus Ku Keenay Somaliland



Hargeysa, September 25, 2020 (W.H.M) - Wasiirka Wasaaradda Horumarinta Maaliyada Somaliland Dr Sacad Cali Shire ayaa barnaamij uu xidhiidhinayey Guddoomiyaha Telefishanka MMTV Md Maxamed Cabdi Sheekh (Ilig) ku falanqeeyey saamaynta dhaqaale ee Coronavirus uu ku keenay dhaqaalahaa Somaliland iyo nooca saamayntaasuu ay tahay. Barnaamijkan oo ay kasoo qaybgaleen qaybaha kala duwan ee bulshadda, isla markaana wasiirka halkaasi lagu waydiiyey su'aalo badan oo dhaqaalahaa wadanka ku taca-luqa ayaa 23/08/2020-kii ka qabsoomay Hotelka Baraar ee magaaladda Hargeisa, iyadoo Wasiirka Horumarinta Maaliyada ugu horayn ku bilaabay sida Coronavirus uu u saameeyey Xoolaha nool oo dhaqaalahaa guud ee Somaliland ka ah boqolkiiba 29%, ayaa waxa uu yidhi "Dhaqaalaheenu inta badan waxa uu ka soo

baxaa xoolaha, inagu xoolo-lay baynu nahay, ilaa boqolkiiba 29%, waxa la yidhaa xataa neefka aynu dhoofinayno ilaa 36 jeer baa la taabtaa, Xerada marka uu ka soo baxo ilaa marka Markabka la saarayo. Markaa dhaqaalahaa xooluhu maaha inuu saameeyo Xoolo-layda oo kaliya, laakiin cid kasta oo ka shaqaysa silsilada neefka marka xerada laga soo saaro ilaa inta la dhoofiyio wuu saamaynaya. Waxa soo raaca xoolaha ka sokow, Ganacsi, inagu ganacsato ayaynu nahay, wexeenana waynu ka ganacsanaa, caalamkana waynu ka ganacsanaa. Ilaa boqolkiiba 22% dhaqaalaheenu waa ganacsi, waxa soo raaco dhismaha oo ah boqolkiiba 9%, Beeruhu waa ilaa boqolkiiba 7%. Dhaqaalaheenu sidaasuu u kala qaybqaybsan yahay.



Siduu markaa qayb walba u saameeyey? Xoolaha soo qaad, Xoolaha barigii hore waxaynu dhoofin jirnay saddex milyan iyo saddex boqol oo kun oo neef (3,300,000 neef), laakiin markii xayiraada lagu soo rogay bishii November 2016-kii oo wali ina saaraan xoolaha aynu dhoofinaa way yaraadeen. Imika xiliga xajka, Moosimkan aynu ku jirno ayaa la inaga furaa inta badan, marka uu moosimku dhamaadana waa la inaga xidhaa, Sucuudiga, suuqeeena ugu weyni waa Sucuudiga. Markaa sanadkan waxay dawladda sucuudigu xidhay dadkii xujaajta ahay ee ka imanayey caalamka intiisa kale, waa dadkii aynu xoolaha ka iibin jirnay. Markaa halkii afarta todobaad ee ka horeeya xajka Carafa, laga yaabo inaynu dhoofin jirnay hal milyan ilaa hal milyan iyo laba boqol oo kun (1,000,000 neef ama 1,200,000 neef), sanadkan waxaan filaa inuu aad

uga yaraan doono intaa. Xooluhu inagama xidhna way inoo furan yihiin, waanay dhoofaan, laakiin dadkii inaga iibsan jiray baa yaraaday, markaa halkaa wuu inaga saameeyey,” ayuu yidhi Wasiirka Wasaarada Horumarinta Somaliland Dr Sacad Cali Shire.

Sidoo kale Wasiirku waxa uu sheegay in Ayixii sanadkan ku habsaday Somaliland uu keeni karo saamayn dhaqaale, isagoo arintaasi ka hadlayana waxa uu yidhi “Dabcan Ayixii sanadkan inoo yimid wuu ina saamaynaya, daaquu saamaynaya, beeruhuu saamaynaya, taasina waa saamayn kale, inkastoo Coronaviruska aanay ku xidhnayn, laakiin inagu timid oo xoolaha ku timid iyada laftigeedu.

Inagu waxaynu dhoofinaa xoolo kaliya, laakiin waxkasta waynu soo iibsanaa, waxaynu sanadkiiba dibada ka keenaa boqolkiiba saddex iyo konton, guud ahaan wax soo saarkeena guudee GDP-galayidhaahdo. Hadaad u rogto lacag waa ilaa hal bilyan iyo boqol milyan (1.1 billion US dollars) oo alaab ah ayaynu sanad walba soo iibsanaa. Markaa meelna waynu ka soo iibsanaa gaadiidna waynu soo saarnaa, wuu inoo yimaadaa ama dakaduu yimaadaa ama madaaraduu yimaadaa. Markii dekedihii uu ka soo dhoofi jiray la xidhay, wershadiihii aynu ka soo iibsan jirnay la xidhay, Diyaaradiihii istaageen, dabcan ganacsigeeniina wuu saameeyey oo dadkii waxa ku dhacay kala go', waxay iibin jireen waxa ku dhacay kala go', saamayn weyn ayuu runtii ku yeeshay. Dabcan dhaqaalihii markii uu xumaadayna dadkii wax iibsan jiray jeebkoodii

markuu dhamaaday iyada laftigeeda saamayn ayay ku keentay. Alaabtaasi aynu soo iibsano ee 1.1 billion dollar-ka ah, ka sokow ilaa saddex milyan oo xoolaha aynu dhoofino ah ka helno inta kale waa xawaaladd." Ayuu yidhi Wasiirka Wasaarada Horumarinta Maaliyada Somaliland Dr Sacad Cali Shire. Intaasi ka dib waxa su'aalo waydiiyey Wasiirka martisharaftii ka soo qaybgashay barnaamijkaasi Wasiirka horumarinta maaliyada lagu waydiiyey bal inuu taxliil ama falanqayn uu ku sammeeyo saamaynta dhaqaale ee Coronavirus ku yeeshay Somaliland.



Buug-yaraha Miisaniyadda Muwaadinka Somaliland 2020

KAABAYAASHA

Kaabayaal la isku hallyn karo, haddii ay noqon lahayd jidodka iyo haddii ay ahaan lahayd tiknoolajiyadda xogta iyo isgaadhsintaba, waxa ay xidhiihayaan muwaadiniinta, waxana ay wax weyn ka taraan koboca dhaqaalaha. Miisaaniyadda qaranka ee 2020, waxa ay mudnaan siimneysaa horumarinta kaabayaasha aas-aasiga ah. Waxa u qoondaysan SISHS 91.3 bilyan oo la mid ah in kor looga soo kacay qoondadii qaybta ugu jirtey miisaaniyaddii 2019 8.5%.

Mashaariicda u qorshaysan wax aka mid ah:

- Hawsha ka socoto mashruuca horumarinta waddada Ceerigaabo iyo tan Oodweyne-Burco iyo, weliba, buundoojin ama birijyo u qorshaysan waddada Ceerigaabo.
- Hirgelinta dawlad ku wada shaqaysa tiknoolajiyadda Elektaroonika (e-Government)
- Samaynta xarumo tiknoolajiyadda xogta iyo xidhiidhka ah (ICT centres)
- Taageeridda isu-furka ama wadahadalka shirkadaha is-gaadhsinta
- Iibka taag dekdedda Berbera si loo kordhiyo kartida waxqabad ee marsada



WAXSOOSAARKA



Dhaqaalaha Somaliland waxa ka bannaan fursado badan oo kobcineed. Miisaaniyadda 2020 waxa ay mudnaan siinaysaa xoojinta waxsoosaarka, gaar ahaan, beeraha, xoolaha, iyo kalluumaysiga. Waxa Miisaaniyaddu uga qoondaysay qaybtan SISHS 54.25 bilyan oo muujinaysa in kor looga soo qaaday halkii 2019 qader dhan 16.9%.

Meelaha bartilmaameedka u ah horumarinta qaytan, wax aka mid ah:

- Mashaariic beereed oo ku kala yaalla Beer, Wajaale iyo Oodweyne si looga beero galley, hadhuudh, sisin iyo khudaar kale.
- Shinni-abuur si beeralydu ay u helaan siidhka ama shinnida ugu tayada badan
- Fidinta beeraha si ay u kordhiyan beeraleydu waxsoosaarka dalaggaa
- Ilalinta abuurka ama dalaggaa si looga hortago cayayaanka waxyeellada u leh
- Beeraha lagu dhaqo xookaha si loo koriyo aqoonta waxsoosaarka xoolaha iyo tarankooda, iyo, weliba, tallaalkooda iyo naaxintooda oo laga hirgelinayo Aroori iyo Qoolcaday.
- Mashruuc dib-xoolayn ah si waxlooga qabto waxyeelladii iyo caydhantii ay kaga tagtagtay reer guuraaga abaartii 2017 taas oo loogu talo galay in 500 oo qoys midkiiba la siiyo kaalmo dhan 20 neef oo isugu jira ido iyo riyo.
- Dhismaha xarumo kalluumaysi iyo qaboojiyeaal
- Iibka doonyo kalluumaysi oo mid ka mid ah Jaamacadda Kalluumaysiga Berbera loogu talo galay, inta kale iyo qalabkoodana loo qaybin doono kalluumaysatada yaryar.

MEELAHA MUDNAANTA KOWAAD DAWLADDU SIINAYSO

HORUMARINTA DHALLINYARDA IYO SHAQO-ABUURKA

Hantida u qaalsan ee Jamhuuriyadda Somaliland leedahay waxa ka mid ah da'yarta iyo bulshadeeda hibada leh. Waxa mudnaan sare u leh dawladda in dhallinyarada la siiyo fursado ay wax ku soo kordhin karaan kob-cinta dhaqaalaha dalka.

Miisaaniyadda 2020, waxa ku jira mashaariic bartirmaameedsanaya horumarinta da'yarta iyo shaqo-abuurka, sida:

- Shaqo-qoridda 2000 oo Shaqada Qaranka ah
- Ku kordhinta Sanduuqa Horumarinta Da'yarta Si.Shs 2 bilyan
- Ballaadhinta iyo tayaynta xarumaha shaqo-abuurka
- Dhismaha garoomo kubbada cagta ah oo laga hirgelinayo Caynaba, Oodweyne iyo Balligubadle iyo dhammaystirka garoonka Ceerigaabo iyo Laascaanood.



DHUL U GAAR AH WARSHADAH (INDUSTRIAL ZONE)

- Abuuridda dhul u gaar ah warshadaha iyo warshadaynta si loo dhimo kharaska dhul-iibsiga iyo dhimidda kharashka abyidda warshado cusub

AQOONSIGA

Jamhuuriyadda Somaliland waxa ay dedaal ugu jirta inay caalamka ka hesho ictiraaf diblumaasiyadeed oo buuxa. Waxa loo suntay yoolkaa Si.Sha 23 bilyan si looga midho-dhaliyo.

DOORASHOOYINKA

Waxa dawladda ka go'an in la helo doorashooyin xaq iyo xalaal u dhaca. Miisaaniyadda 2020 waxa ay u qoondaysay Si.Shs 28 bilyan u-diyaar-garowga hawshaa.

WAA MAXAY SIYAASADDA CASHUURAH EE DAWALADDA EE LAGU ABAABULAYO KHAYRAADKA/DAKHLIGA SANNADKA 2020?

Dawladda waxa ka go'an inay yarayso ku-tiirsanaanta cashuuraha wax-soo-dejinta iyo wax-dhoofinta, iyo fiiyada yaryar ee dul-xaadiska ah. Sii-wadidda kordhinta cashuuraha iyo qaraamada yaryari ma aha mid la joogtayn karo iyada oo qiimahu ku sii kordhayo uun muwaadiniinta reer Somaliland.

Wasaaradda Horumarinta Maaliyadda waxa u qorshaysan inay qaaddo tallaabooyin dhawr ah sannadka 2020 si loo kordhiyo mugga dakhliga ka soo hayda cashuuraha aasaasiga ah.

Cashuuraha aasaasiga ah wax aka mid ah:

Agaasimaha Waaxda Kastamada Wasaaradda H. Maaliyadda JSL oo Tababar u Furay Hawl-wadeenada iyo Daneeyayaasha Kastamka Dekeda Berbera



Berbera, September 25, 2020 (W.H.M) - Agaasimaha Waaxda Kastamada Wasaaradda H. Maaliyadda JSL ayaa 01 September 2020-ka tababar laba cisho qaataay u furay hawl-wadeenada iyo daneeyayaasha Kastamka Dekeda Berbera. Tababarka ayaa ku saabsanayaa barashada hab-raacyada soo dejinta iyo dhoofinta badeecadaha kala duwan, iyo waliba hanaanka loo marayo xaraashka badeecadaha ku raagay Kastamka. Tababarkan oo ahaa mid muhiimadiisa leh marka loo eego arimaha uu koobsanayey isla markaana noociisa aan hore loo qaban, waxa ka faaiidaysanayey shaqaalahka ka hawl-gala Kastamka, iyo 25 xubnood oo ka socday daneeyayaasha Kastamka sida shirkada caalamiga ah ee Dp World, Hay'ada Dhawrista-Tayada, Wakiilada Maraakiibta (Shipping Lines), iyo waliba mukhala-siinta Dekeda Berbera alaaboooyinka ka cashuurta.

Tababarkan waxa fulintiisa is ka kaashaday Wasaaradda Maaliyadda iyo Hay'ada OPM oo Waaxaha Dakhliga gacansinaysay tan iyo sanadkii 2018, iyadoo si gaara loogu xil-saaray bixinta tababarka saraakiisha Xafiiska Dibu-Habaynta iyo Casriyeenta Kastmada ee magaciisa loo soo gaabiyoo CRMS (Customs Reform and Modernisation Section), iyadoo diirada lagu saarayey kor u qaadiista war-qabka daneeyayaasha Kastamka Marsada Caalamiga ah ee Berbera, gaar ahaan arimaha la xidhiidha xeerarka iyo habraacyada Kastamada guud ahaan gaar ahaana kan ugu tunka weyn ee Berbera. Waxa intii tababarku socday si qoto dheer loogu lafa-guray hanaanka loogala baxo Kastamka badeecadaha soo degaya iyo kuwa dhoofaya, sida; qiimaynta iyo kala

saarista alaaboooyinka, takaaliifta uu waajibinayo xeerka Kastamada Somaliland Xeer Lr. 73/2016, iyo waliba adeegsiga hanaanka sumadaha caalamiga ah ee badeecadaha ee loo yaqaan HS Code (Harmonized System), kaas oo ay Hay'ada Kastmada Aduunka ee WCO soo saartay sanadkii 1988-kii, iyadoo shantii sanaba hal mar dib u eegis lagu sameeyo, hanaankan sumadaynta badeecaduhu wuxuu hawl-wadeenada Kastamada u fududaynayaa kala soocida alaaboooyinka tirada beelay ee is kaga kala gudba dunidan casriga ah.



Ugu danbayn, marka la eego falcelintii dadkii loo qabtay tababarkan taas oo ay si togan uga falceliyeen aqoon korodhsigan loo qabtay, iyagoo u muuqday kuwo si weyn ula dhacsanaa isla markaana soo dhaweyey waxa la rajaynaa inuu wax weyn ka tari

doono hab-sami u socodka hawlahha Kastamka, kaas oo ugu jiray Qarankan curdinka ah kaalin muhiima tan iyo markii dib boodhka looga jafay sanadkii 1993-kii, kadib dib u curashadii Jamhuuriyadda Somaliland.

Nuxurka Kulan Ay Guddida Dhaqaalaha ee Golaha Wasiiraddu La Yeesheen qaybo ka mid Ah ganacsatada Somaliland



Hargeysa, September 25, 2020 (W.H.M) - Guddida dhaqaalaha ee Golaha Wasiiradda oo uu hogaaminayey Guddoomiyaha guddida ahna Wasiirka Wasaaradda Horumarinta Maaliyadda JSL Dr. Sacad Cali Shire ayaa 03, 09, 2019-kii

kulan is-xogwaraysi ah la qaataay qaybo ka mid ah ganacsatada Somaliland oo uu hogaaminayey Guddoomiyaha Rugta Ganacsiga, Wershadahe iyo Beeraha Somaliland Md Jamaal Caydiid Ibraahim.



Ugu horayn Wasiirka Wasaaradda horumarinta maaliyadda ayaa ganacsatada uga warbixiyey ujeeddada shirka oo ahayd sidii xukuumadda Jamhuuriyadda Somaliland iyo ganacsatadu ay isaga kaashan lahaayeen horumarinta ganacsiga sidoo kalana ay u wada yeelan lahayeen wada shaqayn dhaw. Guddida dhaqaalaha ee Golaha Wasiirada ayaa ganacsatada uga xogwaramay siyaasadda xukuumadda uu hogaamiyinayo Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland mudane Muusi Biixi Cabdi iyagoo gudida u sheegay in Madaxweynaha

yo xukuumadiisa ay ka go'an tahay in la taageero ganacsiga Somaliland si wadanku u horumaro. Shirka oo muddo 2 saacadood ah socday ayaa lagu lafa guray caqabadaha haysta ganacsiga Somaliland iyo sidii la isaga kaashan lahaa in caqabadahaas si wada jira looga gudbo, waxaana Guddida Dhaqaalalaha iyo ganacsatadu isku afgarteen in ay yeeshana wada shaqayn toos ah sidoo kalena la yagleelo Gole Wada-tashi waxaana lagu balamay in shirar danbe la isugu yimaaddo.

**Wasiirka H. Maaliyadda JSL Oo Guddi-hoosaadka Arimaha Dhaqaalah
Wakiiladda U Gudbiyey Qorshaha xog qoraal ah oo ku saabsan Siyaasada
Hayalka Dhaqaalaha Guud ee Mudada Dhexe ee 2021-2023-ka**



Hargeysa, September 25, 2020 (W.H.M) - (WHM) Wasiirka Wasaaradda H. Maaliyadda JSL Dr. Sacad Cali Shire oo ay weheliyaan Wasiir-Xi-geenka Wasaaradda Md. Muuse Ibraahim Yusuf (Selef), Agaasimaha Guud Md. Maxamed Cabdi Gurxan iyo Madaxda Waaxda Miisaaniyadda iyo Qorshaynta, ayaa 18 August 2020-ka hor tagay Guddi Hoosaadka Arimaha Dhaqaalaha Golaha Wakiilada JSL, iyagoo Gudida u gudbiyey xog qoraal ah oo ku saabsan Siyaasada Hayalka Dhaqaalaha Guud ee Mudada Dhexe ee 2021-2023-ka. Siyaasada Hayalka Dhaqaalaha Guud ayaa ku siman mudo sedex sano ah, taas oo u kala baxaysa

Qorshe-Hawleedka Dawladda sanadka soo socda (2021-ka), sanadkaas oo ah kan hada Wasaaradda Maaliyaddu ku hawlantahay diyaarinta ku talo-galka Miisaaniyadda Dawladda, iyo Qorshaha Istraatejiyadda labada sano ee ku xiga (2022-2023-ka). Gudi-Hoosaadka ayaa Wasiirka iyo Masuuliyiintii la socotay ka dhagaystay xog waran ku saabsan xaalada dhaqaale ee hada dalku ku sugan yahay, iyagoo isla jeerkaasna suaalo ka weydiiyey arimahaan aynu soo sheegnay.



Inkasta oo xaalada dhaqaale ee Somaliland sare u socotay sanadihii la soo dhaafay, hadana sanadka 2020-ka oo odoraskiisa lagu saleeyay koradhka dhaqaale ee sanadihii ka horeeyay waxa saamayn ku yeeshay xaaladiisa dhaqaale cudurka safmarka ah ee Covid-19, isagoo hoos u dhac ku keenay dhamaan xidhiihadii Ganacsi ee Somaliland la lahayd Caalamka intiisa kale sida:

- Dhoofinta iyo soo dejinta,
- lacagta Qurba jooga Reer Somaliland u soo diraan eheladooda,
- isu socodka Cirka iyo Dhulka,
- Mashaariicdii horumarineed ee Beesha Caalamku ka fulin jirtay Somaliland,
- Joojintii soo dejinta qaaddka mudadii bandoodu socotay,
- Cashuur dhimiddii loo sameeyay Daruuriyaad-ka sida Raashinka,
- Xaaladda Siyaasadeed ee Ethopia oo isbadal ka muuqdo,
- Cashuur dhimiddii loo sameeyay Qalabka Caafimaadka.

Waxa kale oo isna saamayn ku yeeshay wax soo saarkii guud ee dalka Ayax baahsan oo ku habsaday dhamaan dhul daaqsimeedkii iyo dhul beereedkii, taas oo sababtay sare u kaca cuntada iyo khudaarta ilaa haddana laga dareemayo Suuqyada Somaliland. Hadaba Wasaaradda horumarinta Maaliyaddu iyadoo ka duulaysa xaaladda dhabta ah ee Miisaaniyadda lix-billoodka hore ee 2020-ka, waxay dib u eegis ku samaysay dakhliga la fili karo dhamaadka sanadkan kaasi oo 10% ka hoosayn doona dakhligii ku talo galka ahaa. Sidaa darteed, iyadoo laga duulayo xaalada dhaqaale ee lixda bilood ee hore ee sanadkan iyo guud ahaan xaaladaha saamaynta dhaqaale inagu keeneen, waxa odoroska sanadka 2021 la filayaan inuu ku dhawaado kii sanadka 2020.

Arimahan oo faahfaahsan waxaad ka heli kartaa Shabakada (Website-ka) wasaaradda H. Maaliyadda iyadoo Somali iyo Ingiriisiba (Somali & English Versions) ku qoran www.slmof.org/Som.slmof.org, idinkoo markasta wixii talo iyo tusaale ah ee aad noo haysaan noogu soo diri kara

Email-ka Wasaaradda Info@slmof.org.

Kulanka Wadatashiga Ururada Bulshada-Rayidka Ah Iyo Wasaaradda H.Maaliyadda JSL Ee Diyaarinta Miisaaniyadda Sanadka 2021-Ka

Hargeisa, September 25, 2020 (WHM) Wasaaradda H.Maaliyada JSL ayaa ku qabatay Jaamacada Hargeisa kulan balaadhan oo dhexmarayey Wasaaradda iyo xubno matalayey ururada Bulshada-Rayidka ah, ujeedada kulanka ayaa ahayd wada-tashiga Bulshada-Rayidka ah iyo Wasaaradda ee diyaarinta Miisaaniyadda Dawladda sanadka 2021-ka.





Sida uu dhigayo xeerka maamulka maaliyadda xeer Lr. 75/2016 waxa loo raacayaa jidwal diyaarinta ku talo-galka kharashka iyo dakhliga Dawladda, sidaa darteed 15-ka bisha July waa goorta ay tahay in loo soo bandhigo Bulshada-Rayidka ah, si ay doorkooda uga gaystaan diyaarinta odoroska Miisaaniyadda Dawladda sanadka soo socda.



Sida uu dhigayo xeerka maamulka maaliyadda xeer Lr. 75/2016 waxa loo raacayaa jidwal diyaarinta ku talo-galka kharashka iyo dakhliga Dawladda, sidaa darteed 15-ka bisha July waa goorta ay tahay in loo soo bandhigo Bulshada-Rayidka ah, si ay doorkooda uga gaystaan diyaarinta odoroska Miisaaniyadda Dawladda sanadka soo socda.

Maaliyadda iyo Bulshada Rayidka ah Dawladda ee Sanadka 2021-ka

ation Meeting Between Ministry

Civil Society Organiza

urgeisa (UoH)

Opportunities

ntate USA

”

lmo.org



Waxa dhinaca Wasaaradda H.Maaliyada JSL ka socday dhamaan masuuliyiinta ugu saraysa, madaxda qaar kamida waaxaha, iyo xafiiska Xisaabaadka Guud.

Waxa intii kulanku socday laysku waydaarsaday afkaaro iyo soo jeedimo dhaxal gal ah, waxaanay ka muuqan doonaan hadii Allaah ogolaado Miisaaniyada sanadka 2021-ka.

Hawshan oo ahayd mid ay aad u soo dhaweeyneen dhamaan ka soo qaybgalayaashii madashu waxay muujinaysaa bisaylka Wasaaradda H.Maaliyada, taas oo Dawladda ugu xilsaran diyaarinta Miisaaniyadda, waana talaabo hore loo qaaday, gaar ahaan dhinaca daah-furnaanta iyo islaxisaabtanka.



Ugu danbayna Wasaaradda ayaa buug-yare ka diyaarisay nuxurkii aragtida dadweynaha, kaas oo markii la abla-ableeyey lagu soo koobay 15 qodob, iyadoo si gaara loogu xilsaaray Waaxaha Miisaaniyadda iyo Xidhiidhka Dadweynaha si ay isula eegaan hadba wixii lagaga camal-falo talooyinkaas iyo soo jeedimahaa dadweynaha.

Guushii Naadiga Wasaaradda H. Maaliyadda Ee Magaaladda Hargeisa Ee Hanashada Koob-Ka SONYO CUP



Hargeisa, 25 September, 2020 (WHM) kooxda kubada-cagta M/jeex ee Wasaaradda H. Maaliyadda JSL Hayaa ku guulaysatay hanashada koobka naadiyada heerka kowaad ee SONYO CUP, koobkaas oo ay qabatay 3-dii bisha March/2020-ka dalada heer qaran ee SONYO, iyadoo ay ku tartamayeen 12 kooxood oo kala kala socday M/Jeex, Awdal iyo Saaxil.

Waxa ciyaarta kama danbaysta ah isugu soo hadhay kooxda Maaliyadda M/Jeex iyo kooxda Ciidanka Qaranka, ciyaarta oo ka qabsoontay garoonka Hargeisa Stadium jamaahiirta taageerayaasha labada dhinac ayaa soo buux dhaafiyey, halkaasi oo ay labada kooxoodba ku soo bandhigeen ciyaar wanaag iyo hab-dhaqan fiican, ciyaarta oo ku dhamaatay jawi nabdoon waxa ay guul lama filaan ahi ku raacday Naadiga Maaliyadda ee G/M/ Jeex, kuwaas oo ugu awood sheegtay Naadiga dhigoodii dhigooda ahaa ee Gaashaa 5:0, taariikhdu markay ahayd 12 August 2020, waxaana goolasha guusha u kala dhaliyey Naadiga Maaliyadda ciyaartoyda kala ah Cabo, Culusow, Bahdoon, Jajariito, iyo caaqilka.

Naadiga Wasaaradda H. Maaliyadda Ee Magaaladda Burco Oo Ku Guulaystay Koob ay Qabatay Shirkadda SOMTEL



Burco, 25 September, 2020 (WHM) Naadiga Kubada-Cagta Wasaaradda H. Maaliyadda JSL ee magaalada Burco ayaa ku guulaysatay Koob ay qabatay shirkada isgaadhsinta Somtel 1 September 2020. Kooxda Wasaaradda H. Maaliyadda ee Burco ayaa 1:0 ugu awood sheegatay Kooxda Goodir ee Ciidanka Booliska Somaliland, taas oo ka dhisan isla magaalada Burco, ciyarta oo lagu qabtay garoonka Alemze Stadium, waxa goolka guusha u saxeexay Naadiga Maaliyadda Burco ciyaartoyga magiciisa layidhaa Kayse Cabdi Cali oo sitay number 7. Koobkan oo ay Shirkadu ugu talo gashay inay ka qabato guud ahaan Gobalada Dalka kaas oo qayb ka ah abaalmarinaha todobaadlaha ah ee ay qabato waxa la ciyaaray hal ciyaar oo qudha. Wuxaan munaasibadii kooxda Maaliyadda Koobka lagu gudoonsiinayey ka soo qaybgalay masuuliyiin ka socotay shirkada Somtel, masuuliyiinta gobolka Tog-Dheer oo uu ugu horeeyo Gudoomiyaha Gobolka,

Masuuliyiinta Wasaaradda Ciyaaraha heer Gobol, Taliyaha Qaybta iyo waliba masuuliyinta Wasaaradda Maaliyadda Gobalka Togdheer, iyadoo halkaa bilado iyo abaal-marino kaleba lagu gudoonsiyyey Naadigii guushu raacday.

Ciyaaraha kala duwan ee yaalaaba loo qabto da'yarta Dalka ayaa ah farsamo lagaga baajin karo dhalinta soo koraya waxyaalaha lidiga ku ah hore u kacooda, sida mukhaadaraadka, balwadaha iyo waxyaabaha la hal maala, iyadoo ciyaaruuhu abuuri karaan jawi is dhix gal ah, isla markaana dhaqanka xun ee qabyaalada meesha lagaga saari karo, taas oo ah mid inala hadhay. Wasaaradda H. Maaliyadda ayaa iyadu ah mid kaalin shariifa kaga jirta dhinaca dhiirigalinta ciyaaraha, waxaanay ilaa hada hawl-galisay Lix Naadi oo ka dhisan Gobolada Dalka kuwaas oo magaceeda ku ciyaara.

=Wabilahi Tawfiq=

